



Macluumaadka cusub ee ciyaaraha: Jadwalka gu'aga oo sii socda

Iyada oo Grant ay calaamadda farxada saartay 'exclamation point' ku guuleysigii ay ku guuleysatay horyaalka wiilasha ee kubadda kolayga, waa waqtigii la soo roggi lahaa bogga xilli-ciyaareedka. Tartanka ciyaaraha gu'aga ee dugsiyada sare ayaa bilowday toddobaadkii la soo dhaafay. Halkan waxaa ku qoran guudmar degdeg ah oo la xiriira Naadiga Dugsiyada Ka Dhexeeya ee Portland.

Ciraaha Fudud: Ardayga ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigta Lincoln ee Sawyer Christopher oo sanadkii la soo dhaafay ku guuleystay horyaalka wiilasha gobolka ee Class 6A ee qori tuurida 'javelin' ayaa raadin doona in uu mar labaad ku celiyo. Ardayga ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigta Wilson ee Alex Slenning, oo dayrtii ku guuleystay horyaalka orodka dheer ayaa isku dayi doona in uu ku guuleysto horyaalkiisa u horeeya ee gobolka. Slenning wuxuu galay kaalinta shanaad ee orodka 3,000 meters iyo kaalinta lixaad oo uu sanadkii la soo dhaafay galay orodka 1,500.

Ardayada ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigata Grant ee Judith Baxter Game ayaa raadin doonta in ay difaacato xirfadeeda dugsiyada sare si ay u qaado horyaalka labaad ee isku xiga ee boodada dheer ee gabdhaha. Waxay ku guuleysatay xilli-ciyaareedkii la soo dhaafay ka dib markii ay kaalinta labaad gashay 2016-kii. Baxter Game waxay sidoo ku darsan kartaa horyaal ah dhanka boodada saddexda jeer la boodo 'triple jump' ka dib markii ay kaalinta afaraad gashay sanadkii la soo dhaafay.

Softball-ka: Franklin waxay isku dayi doontaa in ay ku guuleysato horyaalka saddexaad ee PIL ee isku xiga ka dib markii ay u soo baxday xilli-ciyaareed isku xiga kaasi oo keentay 16-1 marka la eego horyaalka. Kooxda Quakers waxaa hoggaaminaysa ardayada ciyaartooyda ah ee sanadkii saddexaad dhigata ee Samantha Brauckmiller, oo ku guuleysatay abaalmarintii xilli-ciyaareedkii la soo dhaafay ee Kubad Tuuraha Sanadka 'Pitcher of the Year' ee horyaalka. Franklin waxay soo celisay ardayada ciyaartooyda ah ee sanadkii saddexaad dhigata ee difaaca ka ciyaarta 'infielder' ee Emma Foster, oo ahaa kooxdii u horreysay ee la soo xushay ee All-State, iyada oo ay weheliyeen kubad qabatada 'catcher' Maggie Brauckmiller iyo ardayada ciyaartooyda ah ee sanadkii saddexaad dhigata ee kubadda bannaanka ka qabata 'outfield' ee Bailey Nguyen, oo ahaa kooxda ugu horreysa ee laga soo xushay ee naadiyada oo dhan.

Kooxda kale ee ugu horreysa ee laga soo xushay ee naadiyada oo dhan ee soo laabanaysa waa ardayada ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigata Roosevelt ee kubada tuurta ‘pitcher’ ee Grace Ferres, ardayada ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigata Cleveland ee difaaca ka ciyaarta ‘infielder’ ee Marci Roberti, ardayada ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigata Grant ee kubadda bannaanka ka qabata ‘outfielder’ ee Aliya Ewell, ardayada ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigata Wilson ee kubadda bannaanka ka qabata ‘outfielder’ ee Saioa ardayada ciyaartooyda ah ee sanadkii saddexaad dhigata Madison ee kubadda bannaanka ka qabata ‘outfielder’ ee Ally Shuell.

Baseball-ka: Lincoln waxay isku dayi doontaa in ay ku guuleysato horyaalkeedii afaraad ee isku xiga ka dib markii ay kaalinta koowaad sanadkii soo dhaafay wada galeen Grant iyaga oo keenay 15-2 ee horyaalka. Cardinals waxay ku guuleysteen labadii ciyaarood oo ay iska kaga horyimaadeen Grant, taasi oo siiyay in kaalinta ugu sareysa ee horyaalka ee ciyaarta dheeraadka ahayd ‘playoff u soo baxaan.

Grant ayaa muuqata in ay siiso Lincoln waxay ay awoodi karta, iyada haysata saddex ciyaaryahan soo laabanaya oo helay sharafta All-State, oo uu hoggaaminayo ardayga ciyaartooyda ah ee sanadkii saddexaad dhigta ee Kenji Lamdin, oo ah kooxdii u horreysay ee la soo xushay tayo ahaan. Ardayga ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigta ee difaaca ka ciyaara ‘infielder’ ee Sammy Willman iyo ardayada ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigta ee kubadda bannaanka ka qabta ‘outfielder’ ee Jack Fletcher ayaa ahaa kooxdii labaad ee la soo xushay ee All-State ee Generals

Golf-ka: Ardayga ciyaartooyda ah ee sanadkii saddexaad dhigta Lincoln ee Nate Stember ayaa u muuqda in uu noqdo ciyaaryahanka golf-ka ee ay tahay in la fiirsado. Stember oo sanadkii la soo shaafay ay kaalinta sagaalaad qof ku wada jireen qaybta tartanka wiilasha ee Class 6A, ayaa si adag ugu ku dhex ciyaaray roob iyo dabayl jirtay, ka dib markii uu galay kaalinta saddexaad isaga oo sanadkii u horreeyay dhigta dugsiga. Taariikhda Stember waa mid aad uga shishaysa golf-ka dugsiga sare, isaga oo u soo baxay dhowr dhacdooyinka qaranka ah, oo ay ka mid yihiin tartanka U.S. Junior Amateur. Waxaa isla hadaba ka go’an in uu ciyaaro Jaamacadda Oregon.

Ardayada ciyaartooyda ah ee sanadkii saddexaad dhigata Lincoln ee Sophia Zhang, oo sanadkii la soo dhaafay ahayd ciyaaryahanada kaalinta ugu sarreysa kaga jirtay golf-ka gabdhaha, ayaa isku dayi doonta in ay meel sare ka gaarto gobolka ka dib markii ay qof wada galeen kaalinta 30^{aad} si ay ugu soo gudubto halka u sarreysa ee PIL ee tartanka cimiladu xumayd ee gobolka.

Tennis-ka: Ardayada ciyaartooyda ah ee sanadkii labaad dhigata Lincoln ee Julia Rees ayaa markale soo laabatay ka dib markii ay ku guuleysatay horyaalka gabdhaha ee laba-labada loo ciyaaro ‘doubles title’ oo ay ku wehelinaysay gabarta ay walaalaha yihiin ee, Emily, oo hadda u ciyaarta Nebraska. Waa marki labaad ee labada gabdhood ee walaalaha ee Rees ay ku guuleystaan horyaalka laba-labada loo ciyaaro ‘doubles title’ – ee 2015-kii, Emily waxay isbahaysteen gabadha ka weyn ee ay walaalaha yihiin Lindsay si ay guuleystaan.

Tennis-ka wiilasha, Lincoln waxay ku rajo weynaan doonaan in ay sii adeegsadaan dhameystirkeeda kaalinta labaad ee ay ka gashay gobolka ee ay awoodeeda keeneen kooxadaha laba-labada u ciyaara ee soo gudbay. Ardayga ciyaartooyda ah ee sanadkii u dambeeyay dhigta ee Guido Rahr, ardayga ciyaartooyda ah ee sanadkii labaad dhigta ee James Chen iyo ardayga ciyaartooyda ah ee sanadkii saddexaad dhigta ee Danny Luo ayaa dib uga soo laabtay kooxaha loogu talagalay Lincoln, iyo sidoo kale ardayga ciyaartooyda ah ee sanadkii saddexaad dhigta ee Allen Song, oo kaligiis soo gudbay.

-Mike Tokito